



# Tilmaamaha Codaynta & Aganka Wada Shaqaynta

Codaynta waa xuquuqdaada muwaadin Maraykan ahaan, iyo in codkaada aad soo bandhigto si loo maqlaa waxa uu yahay qayb way oo kamid ah dimuqraadiyada. Marka aad xuquuqdaada sii bandhigto codaynta, waxa aad naftaada awood u siinaysaa oo waxa aanad ogaanaysaa waxa muhiimka u ah codkaaga.

**Doorashada sanadkan waxa ay dhici doonaan Talaatada, Noofember 3deeda 2020.** Waxaad ku calaamadsataa taariikhdaada! Gobolo badan ayaa badaley tilmaamahooda codaynta intii lagu jiray safmarka COVID-19. Waxa aad eegtaan inaad codaysaa wakhti hore ama inaad boosta ku codaysaan hadii gobolku ogol yahay. Waxa aad ka heshaa macluumaadka ugu danbeeyay iyo wixii gobolka u gaar ah linkiyada [www.vote.org](http://www.vote.org), [National Conference of State Legislatures](#), iyo [ACLU Resource](#).

**Qaxootigu waxay dalban karaan giriin kaadhka kadib marka ay ku noolaadaan Maraykanka hal sano. Kadib marka ay ku noolaadaan Maraykanka isugayn shan sano, qaxootigu waxa uu dalban karaa dhalashada.**

**Muwaadin kasta oo Maraykanka ah ayaa isku duwaan gelin kara codaynta oo waxa uu codayn karaa doorashooyinka gobolka, federalka iyo deegaanka. Waxa aad isasii duwaan gelisaa inta aad la gaadhay wakhtiga ay ku eeg tahay oo dib isku duwaan geli marka aad guurto ee aad ogaato sida iyo goorta aad codaynayso iyo goobta aad ka codaynayso.**

Riix si aad u ogaato [dalabka giriin kaadhka](#), [dalabka dhalashada](#) iyo [inaad xaqiijiso inaad isku duwaan geliso codaynta!](#)

**VOICE FOR REFUGE ACTION FUND**

**VoiceforRefuge.org**

## Isbadalaha codaynta Coronavirus / COVID-18 dartiis

**Aad** ayay muhiim u tahay inaad codayso sanadkan, markaa waxa aad xaqiijisaa in adiga iyo xubnaha bulshadu ay duwaan gashan yihiin si ay u codeeyaan oo ay u qorsheeyaan goorta iyo sida ay u codaynayaan. Qaabka ugu amaanka badan ee loo codeeynayo iminka waxaa weeye in lagu codeeyo boosta (sidoo kale loo yaqaan codeynta maqnaanshaha). Gobolo badan ayaa balaadhiyay ikhtiyaaradooda ku codaynta boosta, oo kuwa qaar ayaa si toos ah boosta ugu soo diraya cod bixiyayaasha duwaan gashan waraaqaha codaynta maqnaanshaha wakhtiga safmarka. Gobolada kale, waxa aad u baahanaysaa inaad [dalbato waraaqaha codaynta maqnaanshaha](#).

Hadii inta aad goobta tagto aad codaynayso, waxaa wanaagsan inaad wakhti hore inta ayna dadku badan aad codayso, markaa [waxa aad eegtaa goorta iyo hadii goboku leeyahay ikhtiyaar codayn hore ah](#). Hadii aad codayn karto Maalinta Doorashada oo kaliya, waxa aad isku daydaa inaad codayso wakhti ay dadku yar yihiin, waxaana wanaagsan aroorta hore ama gelinka danbe, oo waxa aad iska ilaalisaa saxmada shaqada kadib. Waxaad xaqiijisaa inaad raacdo [talaabooyinka kahortaga COVID-19](#) oo ay ku jiraan xidhashada waji gashadka, farxalka/jeermis ka dilida gacmaha kahor iyo kadib codaynta, in la masaxo agabka codaynta kahor iyo kadib marka aad isticmaasho adiga oo isticmaalaya masaxaada jeermiska disha, inaad iska ilaalisoo inaad taabato wajiga, iyo inaad u jirsato lix fuudh dadka kale, oo ay ku jiraan inta aad laynka ku jirto. Meelaha qaar laga codeeyo waxay leeyihiin ku codaynta jidka agtiisa, halkaas oo dadka codaynayaa iyaga oo gaadhiga ku jira codayn karaan. Lasii hadal [maamulka doorashada degmadaada](#) wakhti hore si aad u eegto inay bixiyaan codaynta wada agteeda.

## Sadex Dariiqo oo Loo Codaynayo

**1. Ku Codee Boosta:** Gobolo badan ayaa u codeeyayaasha u sahla inay ku codeeyaan boosta, iyada oo la isticmaalayo "waraaqaha codaynta maqnaanshaha" kahor inta aan la gaadhin maalinta doorashada. Maadaama oo ay ku adag tahay dadka badanaa, gaar ahaan dadka waayeelka ah, dadka shaqeeya saacada badan ama dadka ka shaqeeya shaqooyinka badan, iyo dadka aan heleynin gaadiidka, inay yimaadaam meesha lagu codaynayo, codaynta wakhtiga hore ee boosta ah ayaa ah waxyaabaha ugu wanaagsan ee lagu xaqiijin karo inay dadku codeeyaan. Marka la eego safmarka COVID-19, waxaa daruuri ah in baro dadka sida codaynta boostu u shaqayso. Waxaad ka dalban kartaa inaad boosta ku cadaydo [gudida doorashada gobolkaaga](#) ama adiga oo galaya [www.vote.org/absentee-ballot](http://www.vote.org/absentee-ballot). Waxa aad xaqiijisaa inaad dalbato wakhti wanaagsan kahor doorashada - [goboladu waxay leeyihiin wakhtiyada kala duwan oo ay ku eeg tahay](#), markaa kaaga dalbo MAANTA!

**VOICE FOR REFUGE ACTION FUND**

**VoiceforRefuge.org**

**2. Codaynta Wakhtiga Hore:** Gobolo badan ayaa leh codayn wakhti hore ah oo goobaha sanduuqyada codayn ah kahor maalinta doorashada. Waxa ay taasi kaa caawinaysaa inaad gelin layn iyo saxmad. In dadka kale loo sheego ikhtiyaarada codaynta wakhtiga hore sidoo kale waxaa weeye qaab wanaagsan oo loo kordhin karo tirada dadka codaynta. Waxa aad ka eegtaa ikhtyaarka codaynta wakhtiga hore ee gobolkaaga [www.vote.org/early-voting-calendar](http://www.vote.org/early-voting-calendar).

**3. Doorashada Maalinta Codaynta:** Fursadaada ugu danbaysa ee codaynta waxaa weeye goobaha codaynta ee Maalinta Doorashada. Waxa aad ka heleysaa xaafada iyo goobta codaynta [www.vote.org/polling-place-locator](http://www.vote.org/polling-place-locator) ama waxa aad ka eegtaa kaadhkaaga codaynta. Gobol kastaa waxa uu leeyahay shuruudo gaar ah, markaa [eeg sharciga gobolkaaga](#) si aad u xaqiijiso inaad soo qaadato waxa aad u baahan tahay (tusaale ahaan: [waxyaabaha sharciga ah waxaa kamid ah aqoonsiga dawlada](#)) iyo [inaad timaado goobta codaynta wakhtiga loogu talo geley](#).

Hadii aad u baahan yahay inaad hesho gaadiid aad u tagto goobta codaynta, waxa aad qoyskaaga iyo asxaabta u balamisaa carpool, ama eeg hadii adeegyada wadaagista gaadiidka sida, [Lyft](#), ay bixinayaan qiimo dhimis maalin doorashada.

***MUHIIM:** Waa [inaad is duwaan gelisaa si aad u codayso si aad u isticmaasho ikhtiyaaradan!](#) Eeg [si aad u xaqiijiso inaad iska duwaan geliso \[www.vote.org\]\(http://www.vote.org\)](#).*

## **Taageer bulshadaada: Waxa aad naga caawisaa inaad kordhino dadka isduwaan gelinaya ee cod bixiyayaasha iyo kuwa codaynay iyo in la baro musharixiinta xaqootiga!**

### **Kordhinta Isduwaan Gelinta Codeeyayaasha**

- ★ Waxa aad kala hadashaa qoyskaaga, asxaabta iyo jaarkaaga wixii ku saabsan arrinta codaynta, oo waxa aad xaqiijisaa inaad isku duwaan geliso codaynta iyo sida, halka iyo goorta la codaynayo. Badanaa gobolada waxay leeyihiin is duwaan gelin online ah, waxaana caadiyan lagu xaqiijiyaa boosta.
- ★ La wadaag [macluumaadka ku saabsan wakhtiga ay ku eeg tahay is duwaan gelinta](#), [xeerarka codaynta hore](#), oo waxaa loo baahan yahay in boosta lagu codeeyo. Waxa aad sidoo kale ka heli kartaa khayraad [Vote411](#) ama aad ka eegi kartaa doorashada gobolkaaga websaytka gudida.
- ★ Waxa aad ku qabataa kulamo maqal iyo muuqaal ah oo isduwaan gelinta codaynta ah adiga oo la wadaagaya shaashadaada oo online ahaan isku duwaan gelinaya, ama [waxa aad isku duwaan gelisaa tobobarka online-ka ah ee codaynta ku saabsan](#).
- ★ Waxa aad ka faa'idaysaa baraha bulshada iyo app-ka fariimaha si aad fariintaa codaynta u dirto, sababta ay muhiimka u tahay in la codeeyaa, iyo khayraadka codaynta. Waxa aad bilawdaa tartar baraha bulshada ah adiga oo ku taag

**VOICE FOR REFUGE ACTION FUND**

**VoiceforRefuge.org**

garaynaya 5 asxaab iyo qoyskaaga si aad ugu dhiiri geliso inay codeeyaan oo waxa aad dadka kalena ku carisaa inay sidaa sameeyaan!

- ★ Waxaad dhax gelisaa waxbarashada codaynta iyo duwaan gelinta munaasabadaha maqal iyo muuqaalka ah ee jira sida fasalada dhalashada, ama adiga oo abuuraya munaasabado codayn ah oo gaar ah adiga oo dadka khudbada jeedinaya ka dalbanaya inay dadka baraan sida la iskugu duwaan geliyo codaynta, samaynta iyo/ama wadaagista fiidyawga macluumaadka ee dadka markii kowaad codaynaya, iyo/ama isticmaalka zoom ama join.me si loo tuso sida dhalashada loo qaado sida loo buuxinayo foomamka isduwaan gelinta codaynta oo waafaqsan sharciga gobolkaaga.
- ★ Waxa aad ku biirtaa asxaabta isku dirayo qoraalada iyo taleefanka madhan si ay isku xasuusiyaan oo ay uga caawiyaan dadka inay is duwaan geliyaan.

### **Kordhinta Tirada Codeeyayaasha**

- ★ Waxa aad bartaa xubnaha bulshada adiga oo u marinaya baraha bulshada, tobobar webinar ah, fiidyaw iyo bayaano wixii ku saabsan ku codaynta boosta gobolkaaga.
- ★ Isticmaal fariimo qoraal ah iyo taleefan madhan si aad u xasiiso dadka codaynta wakhtiga hore ama in lagu codeeyo boosta marka ay macquul tahay, adiga [la wadaagaya wakhtiga ay ku eeg tahay codayntu](#) iyo [khariirada isdhaxgalka ee sida loo codaynayo](#).
- ★ Qof kasta xasuusi in Noofember 3deeda ay tahay maalinta codaynta! Kula wadaag macluumaadka [goobaha codaynta deegaanka](#) iyo saacadaha.
- ★ Waxa aad ku faafisaa macluumaadka doorasahda wargeyska deegaanka, wargaysyada, waxa aad soo dhigtaa qodobada, u dir dadka iimeelka kuugu jira iyo bayaano kale, oo ay ku jiraan waxyaabaha in macluumaadka codaynta loo diro luuqado kala duwan.
- ★ Waxa aad kala shaqaysaa ururada waxooga iyo dadka soo galaytigu hogaamiyaan iyo ururada bulshada si aad iskugu duba rido dadaalka codeeyayasha ee Maraykanka Cusub.
- ★ Waxa aad u diyaarisaa carpool ama noocyo kale oo gaadiid ah xubnaha bulshada u baahan kara inay tagaan goobta codaynta.
- ★ [Waxaad ugu deeqdaa wakhtigaaga si aad uga shaqayso meelaha codaynta](#) adiga oo iska kaashanaya [maamulka doorashada degmada](#), [waxaad ku biirtaa ururka ilaaliya xuquuqda codeeyayaasha](#), iyo/ama waxa aad markaba gaadhsiisaa macluumaadka wixii dhib ama aad ka shakido ee codeeyaha adiga oo la hadlaya 1-866-OUR-VOTE.

### **Bar Musharixiinta Qaxootiga**

- ★ Waxa aad waydiisaa saraakiisha iyo musharixiinta macluumaadka ku saabsan taageeradooda qaxootiga inta lagu jiro kulanka maqal iyo muuqaalka ah iyo ka hoolka shirarka ka dhaca. Waa kuwan waxoogaa fikiro:
  - **Federalka: Musharixiinta Wakiilada Maraykanka, Xildhibaanada iyo Madaxweynaha:** Maamulku waxa uu burburiyay barnaamijka dib u dejinta qaxootiga iyo magan galyo doonka. Miyaad gelin doontaa dadaal aad ku

**VOICE FOR REFUGE ACTION FUND**

**VoiceforRefuge.org**

ilaalinayso oo aad dib ugu soo celinayso barnaamijyada noloshada badbaadinayay? Miyaad taageertaa Sharciga GRACE Act, kaas oo qaxootiga la keenayo ku celinaya tiradooda 95,000 sanadkii?

- **Heer Gobol: Xildhibaanka Gobolka, Wakiilada Gobolka, Badhasaabka:** Miyaad taageertaa xeerarka lagu xoojinayo adeegyada isdhaxgalka ee Maraykanka Cusub si loo bixiyo taageero dheeraad ah oo Ardayda Ingiriisiga Baranaysa, Turjubaada, shaqo gelinta, iyo guryaynta? Qaxooti iyo dad soo galayti ah oo badan ayaa leh khibrad hore oo xirfadle daryeelka caaifmaadka oo waxayna doonayaan inay gacan ka gaystaan mushkilada COVID, laakiin waxaa caqabad ku ah liisanka inay taas sameeyaan. Miyaad ka taageeri doontaa inay helaan xirfadlayaasha tobobarka caalamiga ah qaatay liisan iyo shahaado?
- **Deegaanka: Xubnaha golaha deegaanka, Wakiilada Degmada, Duqyada, Gudida Waxbarashada:** Miyaad taageersan tahay ansixinta xeerka magaalo/degmo soo dhawayn leh si aad u muujiso in degmada/magaalada ay soo dhawayso qaxootiga iyo dadka soo galaytiga gacmo furan?
- ★ Waxa aad soo dhigi kartaa su'aalaha iyo arrimaha aad danaynayso ee ku saabsan mushrixiinta Facebook gooda ama Twitteradiga oo baadhaya Twitter kooda oo isticmaalaya @ [waxay ku galaan] qaabka ah.
- ★ Waxa aad Waraaqo u dirtaa Tafatiraha (LTE) iyo Faalada (Op-EDS) ee wargayskaaga deegaanka wixii ku saabsan sababta aad u codaynayso iyo muhiimiyada in la dhiso bulsho soo dhawayn leh.

**Yaad u codayn kartaa?** Doorashada federalka waxaa kamid ah Madaxweynaha afartii sano mar, hal wakiil labadii sanoba, iyo xildhibaanada lixdii sano mar. Doorashooyinka gobolka iyo deegaanka waxa kuk kala duwan goobaha waxaana weeye badhasaabka, xildhibaanada gobolka, duqa, maamulka degnada, xeer ilaaliyaha degmada iyo xubnaha xildhibaanada dawlada hoose. Caadiyan, doorashada waxaa la qabtaa Noofember, in kasta oo doorashada deegaanka, doorashada hordhaca ah, doorashada gaarka ah iyo talaabooyinka codaynta - marka codeeyayaashu ansixinayaan ama diidayaan sharciyo gaar - waxay dhici kartaa wakhti kasta. Waxa aad dalban kartaa dalabkaaga ama waxa aad eegi kartaa muunada waraaqaha codaynta ee [maamulka doorashada degmadaada](#) ama waxa aad ka heli kartaa hay'adaha samofalka sida [vote411.org](#) kahor inta aanad codaynin si aad markaa musharixiinta u baadho. "Doorashada hordhaca ah" waxa ay dhacdaa dhawr todobaad kahor doorashooyinka badankood, taas oo codeeyayaashu ay dooran karaan mushaharaxa loosoo xulayo xisbiga ee u tartamaya "doorashada guud". Gobolada qaar, waxa inaad iska duwaan gelisaa xisbi gaar ah si aad u codayn karto doorashada hore.

**Yay tahay inaad u codayso?** Cidna maaha inay kuu sheegto sida aad u cadaynayso - adiga ayaa go'aansanaya laftaadu oo maaha inaad u sheegto cidna cida aad u codaynayso ama sababta. Si aad u gaadho go'aanka, waxa aad ka heli kartaa tilmaamaha codaynta, muudana waraaqaha codaynta, iyo wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan meesha uu ka taagan yahay waxyaabaha aad danaynayso [voteeasy.votesmart.org](#).

**VOICE FOR REFUGE ACTION FUND**

**VoiceforRefuge.org**